

# KU DHASHAY MEEL AAN JIRIN?

U jihaysan in loo helo caruurta ku nool dalalka aan la aqoonsan nidaam caalami ah oo loo dhan yahay oo xuquuqdooda lagu ilaaliyo

## Koobniin

### UJEEDADA WARBIXINTA

Waxa la sheegaa in xuquuqal insaanku ay yihiin kuwo cid waliba leedahay (universal), iyo in dhammaan caruurta adduunka oo dhan joogtaa ay leedahay xuquuq, iyada oo aan la eegayn afkooda, dhalashadooda iyo qoomiyadda ay ka soo jeedaan. Hadana, waxa jira koox caruur ah oo si habaysan looga reebay oo uga maqan ilaalinta sharci ee caalamiga ah: ***waa caruurta ku nool dalalka aan aqoonsiga haysan***. Warbixintani waxa ay bulshada caalamka ku wargelinaysaa oo xog ka siinaysaa caruurtaas iyada oo soo bandhigaysa talooyin ku saabsan sida caruurtaas loogu dari karo.

### QORAYAASHA

Koox cilmi baadhayaal ah oo ka tirsan Jaamacadda Maastricht iyo dadkii ka qaybgalay Shirka Caalamiga ah ee “Xaqiijinta Xuquuqda Horumar ee Caruurta ku noool Dalalka aan la Aqoonsan,” oo la qabtay January 2024.

### WAA MAXAY DALKA AAN LA AQOONSAN?

Dalalka aan la aqoonsan waa unugyo siyaasi ah oo buuxiyay dhamaan shuruudaha dalnimo (ee ku qoran Mucaahadada Montevideo ee 1933): kuwaas oo ah shacab joogto ah, dhul cayiman, dawlad iyo awoodda ay kula geli karto xidhiidh dalalka (kale), islamarkaana ku dhawaaqay madax-banaani, balse aan xubin ka ahayn Qaramada Midoobay. Maanta, waxa ka mid ah Kosovo, Somaliland, iyo Jamhuuriyadda Turkiga ee Woqooyiga Qubrus. Qiyaastii waxa ku nool caruur gaadhaysa 9 milyan.

### DHIBAATADA

Marka laga reebo Falastiin, xuquuqda caruurta ku nool dalalka aan la aqoonsan ma kormeeraan hay’adaha Qaramada Midoobay. Dalalka aan la aqoonsan uma gudbiyaan warbixin hay’adaha xuquuqal insaanka ee Qaramada Midoobay. Ma jiraan warbixin dawladeed iyo warbixin ururada bulshadu diyariyaan oo la gudbiyaa. Taasi waxa ay keentay in xuquuqda caruurta lagu xadgudbo iyada oo aan xisaabi ka dhalan.

WAX BADAN KA AKHRI BACKTAAL >

## XALALKA LA SOO JEEDIYAY

Maaha wax la aqbali karo in caruurta ku nool dalalka aan la aqoosan aanay helin ilaalin la mid ah ta ay helaan caruurta ku nool dalalka (sida buuxda) loo aqoonsaday. Iyada oo taas maanka lagu hayo, inta ay jiraan dalal aan la aqoosan oo khilaafkooda aan la xalliyin, waxa aannu soo jeedinaynaa dhawr arimood oo xal ah:

1. **In la magacaabo U-qaabilsane gaar ah oo Qaramada Midoobay ah (UN Special Rapporteur) oo u qaabilsan xuquuqda caruurta (ama: xuquuqal insaanka guud ahaan oo ay ka mid yihiin xuquuqda caruurta) ku nool dalalka aan la aqoosan.**

2. **In lagu daro dalalka aan la aqoosan kormeerada iyo warbixinada ay Qaramada Midoobay ka samayso xuquuqda caruurta.** Waxa aannu taxnay laba hab oo suurtagal ah annaga oo u kala horumarinay sida ay u kala mudan yihiin:
   - **a.** **In dalalka aan la aqoonsan loo ogolaado oo lagu casumo inay saxeexaan oo ansixiyaan Mucaahadada Qaramada Midoobay ee Xuquuqda Caruurta.** Waxa jira habab u suurtagelinaya jilayaasha aan dawliga ahayn inay sidaas sameeyaan. Labadan hab ayaa ah kuwa u xooggan ee la samayn karo:
     - **i.** In Golaha loo Dhan Yahay ee Qaramada Midoobay uu ku casumo inay ansixiyaan Mucaahadada Qaramada Midoobay ee Xuquuqda Caruurta.
     - **ii.** In Golaha loo Dhan Yahay ee Qaramada Midoobay uu ku casumo inay "noqdaan dal aan xubin ka ahayn balse goobjooge ka ah Qaramada Midoobay" si la mid ah hanaanka ay ku joogaan Falastiin iyo Holy See, si ay dabadeed u saxeexaan/ansixiyaan Mucaahadada Qaramada Midoobay ee Xuquuqda Caruurta.
   - **b.** **In loo ogolaado oo lagu casumo dalal (kale) inay ku daraaan warbixinadooda xuquuqda caruurta ku nool dalalka aan la aqoosan.** Sida ugu fiicani waa in dalalka aan la aqoonsan loo sameeyo qayb gaar ah, ama in lagu lifaaqo, warbixinta dalka la aqoosan yahay.

3. **In la dejiyo hab si joogtaysan oo caddaalad ah ay ula dhaqmaan hay'adaha kala duwan ee Qaramada Midoobay dalalka aan la aqoonsan.**

4. **In la diro farriin.** In la soo saaro qoraal xaqiijinaya in dhamaan caruurtu ay leeyihiin xuquuq iyo in ilaalinta xuquuqda caruurta ku nool dalalka aan la aqoonsan ay tahay mudnaan.

Children's Rights Research

**Maastricht University**
**Faculty of Law**
Bouillonstraat 1-3
6211 LH Maastricht
The Netherlands
childrensrights@maastrichtuniversity.nl
childrensrightsresearch.com
Powered by MV80.nl

childrightsresearch
childright1410
ResearchOnChildrensRights